UNHCR
United Nations High Commissioner for Refugees
Haut Commissariat des Nations Unies pour les réfugiés

ΚΥΠΡΙΑΚΗ ΔΗΜΟΚΡΑΤΙΑ
ΥΠΟΥΡΓΕΙΟ ΕΣΩΤΕΡΙΚΩΝ

# Warbixinta caruurta dalbanaya magangalyada ee xubna ka tirsan qoyskoda ay ku sugan yihin wadan kale oo Yurub ah.

## 1) Yaa macluumaadka warbixintan loogu talagalay?

Maclumadka warbixintan waxa loogu talagalay **carurta da'doda** ay ka hoosayso 18 ka sano ee magangalyada ka dalbaday Khubrus,ee anan wahelin waalidkoda ee doonaya in ay la midooban xubna ka tirsan qoyskoda ama qarabadooda ugu dhow kuwaso si sharci ah ugu sugan wadan kale oo Yurub ah.warbixintan waxa ay u sharaxaysa labada dhinac qaabka sharci ahaan ay u suurta gali karto isla midoobitanka qoyska.

## 2) Maxaan u baahanahay in sameeyo si aan ugu biiro xubin ka tirsan qoyskayga / qaraabo dal kale oo Yurub ku nool?

Waxa jira sharci ay ku heshiiyen wadamada midowga Yurub ee loyaqano **xeerka Dublin** kaasi oo loo aas aasay in masuul uu ka noqdo codsigaga magangalyo doonimo wadanka ugu horeya ee aad aad soo gaarto kaasi oo go'an ka gaari dono codsigaga waana wadamada Dublin ee hoos ku xusan ee sida,Ostariya, Bilgim, Bulgariya, Karotiya, Khubrus, Jeek Republik, Danmak,Istonia, Fiilad, Faransa, Jarmany, Gariig,Hangari,Aysland, Ayrland, Talayani, Latfiya, Iiijistiin, Iituuniya, Lusinbeeg,Maalta,Nadarlaand, Norway, Poolan, Portaqiis, Romaniya, Islofakiya, Islofeniya, Ispeen, Isweden, Iswisarlaan iyo Boqortoyada Ingiriska.

Marka ugu horayso ee aad tagto xafiska magangalya doonka ee Khubrus wareysiga waa in si sax ah aad u cadaysa una faahfaahisa cida aad tahay da'dada,xubnaha qoyskaga ka tirsan ama qarabadada ee ku sugan wadan Yurub ka mid ah in aad sheegto waxa ay sahlaysa codsigaga magangalyo doonimo si aad ugu biirto qoyskaga sida (Hooyo,Aabe,Walal,Walasha)ama qarabada dhow sida (Eedo,Ader,Ayeyo,Awowe)

Masuulka/wakiilkaga waa kan dhanka dowlada masuulka kaga ah waxuna ka caawin doona inta aad ku sugan tahay Khubrus ila aad ka gaarayso 18 waxu kugu wahelin doona waraysigaga magangalya doonimo waxa una ka cawin doona codsiga ku saabsan la midoobitanka qoyskaga markasta ad u baahatana waxa uu kala hadli doona maamulka isaga/ayada si loo hubiya baahidada gaarka ah ee ugu wanagsan tasi oo macnahedu yahay in la hubiyo amaankaga.ladnaantada iyo wixi adiga kuu gaar ah lana tixgeliyo. Codsigaga ee ah  ina ku biirto qoyskaaga xubin ka tirsan haddii ay tahay  daneentada ugu muhimsan.

## 3) Siden ku xaqiijin kara ina ahay qof da yar ah.

waa in aad u siisa maamulka documentsyo cadeenaya da'da aad dhalatay sida Passapor,warqada dhalashada,oo ku cad da'da mana la tix raaci doono hadii ay noqdan kuwa an macquul ahen inta lagu guda jiro wareysiga ay kula yeelanaya maamulka  waxa suuragal ah in lagu diro baaris xaga da'da ah madama laga yaabo in qolada maamulka ay ku waydistay in aad marto baaris caafimaad oo ay ku ogadan da'dada in ay ka yar tahay 18 sano.si walba ay ahaatana waxa baarista cafimad lagaga qadi dona mesha adiga iyo wakiilkaga aad ku ogalatan si qoral ah waxana kugu wahelin doono wakiilkaga waxana jawabta ku sharaxi doono wakiilkaga iyo sargal ka tirsan waaxda magangalya doonka hadii ay jiran wax aadan fahmina waa waydin karta.

## 4) Maxa kale oo warbixin ah oo lobahan yahay?

Si aad u soo gudbisid codsigaaga isku keenista qoyska dal Dublin ah, halkaas oo ay ku joogan xubin qoyskaga ka mid ah ama qaraabo,waaxda magangalya doonka waxad u baahan doontaa in aad uso gudbiso macluumaadkan soo socda:

- Qoraal ogolasho ka timid qoyskaga/qarabadada taasi oo isaga ama ayada ay ku ogolanaya in ay qadayan daryeelkaga
- Qoraal adiga kaa yimid/ama wakiilkaga taasi oo aad ku ogolanayso in laguu gudbiyo.
- Documentiyada muujinaya xubnaha ka tirsan qoyskaga/qarabadaada in si sharci  ah ay ku jogan dalkas(Tani waxay noqon kartaa sida magangalyo doon)
- Caden la xarirta qofka aad doonayso in aad u tagto.
- Adareeska/Ciwaanka qoyskaga/qarabadaada.
- Faahfaahinta qoyskaga/qarabadaada dhaqalaha soo gala iyo xaalada nolosha (Hoyga)

- Caden ku saabsan qoyskaga/qarabadada in ay awoodan qaadiska masuliyada daryeelkaga.

**Xasuuso:adiga iyo xubnaha qoyskaga/qarabadada ee ku nool wadan kale oo Dublin ah waa in mamulka aad u qortan in aad rajenaysan in aad midowdan.waa in aad sameysan codsiga warbixinta loo baahan yahay ee da'da,xubnaha qoyska/qarabadada iyo ayada ama isaga waa in uu awooda in uu ku qaado.**

### 5) Mudo inte la ek ayay qaadan karta howshan.

Habka magangalyo ee Jamuriyada Khubrus waxa ay dib u eegi doonta dacwadada iyo Documentisyadada aad soo gudbisay hadii lagu qanco waxa loo gudbinaya codsigaga wadanka Dublin ee qoyskaga/qarabadaada ay ku nool yihin.sharciga Dublin wuxu qeexaya marka la gudbiyo codsigaga waxa ay qaadan karta **sadex bil** laga bilaaba taariqda aad codsatay magangalyada.ka hor codsiga waxa awooda in aad keento dhaman maclumadka nuxurka leh oo ay ku jiran cadenta da'dada waxana wakiilkaga la ogaysin doona in la diray codsigaga.

Wadanka ay ku nool yihin qoyskaga qarabadada ayaa baari doono codsigaga waxuna go'an kuso gaari doono **laba bil** gudaheed.hadii wadanka uu aqbalo masuuliyada codsigaga waxa ay qaadan doonta in laguu diro mudo **lex bil** ah oo ka bilaabanaysa waqtiga lagu aqbalay.wadankas wuxu baaris ku samen doona codsigaga magangalyo doon iyo go'anka lagugu ogolaaday in wadankas aad ku noolato.

Hadii anan la aqbalin masuuliyada codsigaga waaxda magangalya doonka waxay qoral ku waydiinaysa in dib loo fiirsho go'anka inta badan dalkas wuxu kuso jawaba laba isbuuc mararka qaarna in ka badan ayay qaadata.

### 6) Faraha la iska qaado – Maxay yihiin?

Markaad codsato magangalyo, haddii aad tahay 14 jir iyo kawayn, sawir farhaaga ah(oo la dhaho "faro qaadis") ayaa la qaadi doonaa waxaana loo gudbin doonaa kaydka xogta la yiraahdo "Eurodac". Waa inaad wada shaqayn ka gaysataa habkan, - dhamaan dadka magangalayada dalbada wuxuu sharcigu ku waajib yeelay in faraha laga qaado.

Faraha lagaa qaaday waxaa laga hubin karaa isla meesha si loo eego in aad waligaa codsatay magangalyo hadda ka hor ama in la eego in horay faraha lagaaga qaaday meel xuduud ah. Haddii la ogaado in aad horey magangalyo uga dalbatay wadankale oo Dublin katirsan, waxaa laguu diri karaa wadankaas haddii ay dantaada ku jirto inaad halkaas tagto. Wadankas ayaa markaa masuul ka noqn doona baadhitaankacodsigaaga magangalyada caalamiga ah.

### 7) Waxan qaba su'alo dheeri ah siden jawab ku heli kara.

Haddii ay jiraan wax aadan fahmin, waydiiso wakiilkaaga ama maamulkayaga si ay kuu caawiyaan!

---

**Nicosia, October 2016**

**SOMALI**